

Talaal badan oo degdeg ah lagu talaallayo reer Alberta

Maarso 03, 2021

Alberta waxay kordhineysaa mudada udhaxeysa qiyaasta koowaad iyo labaad ee tallaalka KOOFID-19.

Laga bilaabo 10ka Maarso, qof kasta oo qabsada balanta koowaad ee tallaalka waxaa loo kordhin doonaa jadwalka labaad ee tallaalka illaa afar bilood, ballanta ayaa la qabsan doonaa taariikh dambe.

Caddeymaha soo baxaya waxay muujinayaan in qiyaasaha ugu horreeya ee dhammaan tallaallada hadda la oggolaaday ay u muuqdaan inay ugu yaraan boqolkiiba 80 wax ku ool u yihiin ka hortagga natiijoyinka daran ka dib qiyaasta koowaad ee tallaalka.

Jadwalka 16ka usbuuc ee qiyaasaha labaad wuxuu keenayaa in Alberta la saf tahay Biritish Kolombiya (British Columbia) iyo deegaanada kale.

Bixinta tallaalka la keenay ayaa timid sida ay horay u sheegtay dowladda federaalka, waxaan sii wadi doonaa iney reer Alberta qaataan tallaalka sida ugu dhakhsaha badan uguna nabdoon ee suurtoogalka ah.

“Waxaan ku shaqeyneynaa caddeynta ugu fiican ee la heli karo si loo ilaaliyo qofkasta reer Alberta ah. Isbeddelkan wuxuu awood u siinayaa kumanaan reer Alberta ah inay si dhakhso ah u helaan tallaalkooda iyadoo weli la hubinayo in qof kastaa helo difaac labaad oo tallaalka ah. Sida ugu dhakhsiyaha badan aan u siin karno tallaalka reer Alberta, ayaa u awoodi doonaa inaan si ammaan ah u fududeyno xannibaado badan oo ka jira gobolka oo dhan.”

- *Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka*

“Si joogto ah ayay caddaymaha KOOFID-19 isu beddelayaan. Waxaan ku aragnay cilmi baaris laga sameeyay deegaanada kale in hal qiyaas oo tallaalka Moderna ama Fiser (Moderna or Pfizer) uu si weyn u xoojinayo difaac, ugu yaraan boqolkiiba 80. Waxaan sii wadi doonaa inaan hagaajino qorshaheena tallaalka si aan ilaalino reer Alberta, taasoo ka tarjumeysa in baaritaanka waqtiga dhabta ah ee la sameynayo.”

- *Dr. Deena Hinshaw, madaxa caafimaadka*

Dhammaan ballamaha jira ee qiyaasaha tallaalka labaad waa la qadarin doonaa. Qof kasta oo qaata qiyaasta ugu horreysa 10-ka Maarso kahor wuxuu ku qaadan doonaa qaadashadiisa labaad muddo 42 maalmood gudahood ah.

Laga bilaabo Maarso 10, dadka u qalma reer Alberta waxay qabsanayaan ballanta ugu horreysa oo keliya. Waxay xusuusin ka heli doonaan Adeega Caafimaadka Alberta (AHS) ama farmashiyaha kaqeybgalaya inay qabsadaan taariikhda dambe ee ballanta labaad.

Dadka Alberta ku dhashay 1946 ama wixii ka horreeyay waxay ballansan karaan farmashiyaha ka qaybgalaya arrimaha talaalka ee Kaalgari (Calgary), Edmonton ama Red Deer. Waxay sidoo kale ballansadan karaan ballamaha khadka tooska ah iyagoo adeegsanaya Adeegyada Caafimaadka ee Alberta ama soo wac 811.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyadoo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka una mareysa tilaabooyin sax ah, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Ilaa hadda, 255,283 oo ah tallaalka KOOFID-19 ayaa laga qaatay Alberta.
- 89,094 reer Alberta ayaa si buuxda loogu tallaalay laba qiyaasood oo tallaalka KOOFID-19 ah.
- Xog dheeraad ah oo ku saabsan wejiyada soo socda ee soo saarista tallaalka Alberta ayaa la sii deyn doonaa toddobaadyada soo socda.

Xog la xiriirta

- Barnaamijka tallaalka KOOFID-19 ([COVID-19 vaccine program](#))

Weydiimaha warbaahinta

[Steve Buick](#)

780-288-1735

Xoghayaha Saxaafadda, Caafimaadka

[Tom McMillan](#)

780-422-4905

Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dawladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.